**B Together**

**** Hirgelin dhakkso ah, Duqa magaalada Michelle Wu waxay ku dhawaaqda in shaciga magaalada ee B Together oo ahaa in macaamiisha iyo shaqaalaha gudaha meheradaha qaarkood ay muujiyaan caddaynta tallaalka ka hortaga Covid-19 ka la qaadi doono ****

## Soo bandhigida B Together: Shuruudaha tallaalka Covid-19 ee Boston ee xulashada goobaga gudaha ah.

Bilowga 15ka Janaayo, 2022, si was looga qabto xaaladaha sii kordhaya ee Covid-19 laguna dhiiri geliyo tallaalka, shakhsiyaadka ayaa looga baahanyahay in ay muujiyaan cadaynta tallaalka ka hortaga Covid-19 si ay u galaan goobaha gudaha ah ee Boston.
Dadka ka shaqaynaaya goobahaas ayaa sidoo kale iyagana looga baahanyay in ay qaataan tallalkooda.

Sida ugu wanaagsan ee Boston caafimaad ugu heli karto oo ay ku taageerto bulshooyinkeena, ganacsiyadeena,iyo machadyada dhaqanka waa in dad badan la tallaalo. Siyaasadda B Together ayaa inaga caawinaysa taas.

La soo degsan karo hal bog oo llogu talo galy shakhsiyaadka iyo ganacsiyada

### B TOGETHER: Tallaalka Boston Looga Baahanyahay Xulashada Goobaha Gudaha Ah

Billowga 15ka Janaayo, 2022, dadka waxaa looga baahan doonaa in ay muujiyaan caddaynt tallaalka ka hor taga Covid-19 si ay u galaan meelo gudaha oo Boston ah oo bixiya:

- Gudaha meelaha cuntada oo ay ku jiraan, baararka iyo meelaha lagu caweeyo.
- Jiimka gidihiisa ama meelaha jidh dhiska gudahooda.
- Gudha meelaha madadaalada.

I aad u hesho liisto faahfaahsan ee meelaha uu saamaynayo, fadlan halkan riix.

Shaqaalaha ka shaqaynaaya goobahaas ayaa sidoo kale ayaa iyagana looga baahanyahay in ay qaataan tallaalkooda.Ganacsiyada saamaynta ku leh ayaa mas'uul ka ah hubinta cadaynta tallaalka iyo soo dejinta ogaysiiska ku saabsan Covid-19 Magaaladuna waxay halkan u joogtaa in ay ku caawiso.

Riix halkan si aad u hesho sawirka daabici ee ogaysiisak ah, ee looga baahanyahay in ganacsadada uu saamaynayo albaabkooda ku dhejiyaan.

B Together

Si aad u gasho mid ka mid ah xarumaha kor ku xusan, waxaad u baahantahay in aad muujiso in lagaa tallaalay xanuunka Covid-19. Xaqiijintaana waxaa lagu muujin karaa:

- Kaadhka tallaalka ee CDC da
- Sawirka dhijitalka ah ee kaadhka CDC da
- Sawirka diiwaan kasta oo tallaalka rasmiga ah
- App-ka magaalada Boston ama Covid kasta oo kale oo ah xaqiijinta tallaalka Covid.

Wakhtiga:

| | |
|---|---|
| Sabtin 15ka Janaayo | Dadka da'doodu tahay 12 iyo ka wayn waa in ay muujiyaan cadaynta hal xabo oo tallaal ah |
| Salaasa, 15ka Febraayo | Dadka da'doodu tahay 12 iyo ka wayn waa in ay muujiyaan cadaynta talaal buuxa |
| Salaasa, 1da Maarso | Dadka da'doodu tahay 12 iyo ka wayn waa in ay muujiyaan cadayn ah tallaal buuxa. Carruurta da'doodu u dhaxayso 5 ila iyo 11 waa in ay muujiyaan cadaynta hal xabo oo tallaal ah |
| Axad, 1da May | Dadka da'doodu tahay 5 iyo inta ka wayn waa in ay muujiyaan cadaynta tallaal buuxa. |

Si aad wax badan uga barato sharciyadan iyo helitaanka macluumaadka dadka degaanka iyo ganacsatada, please booqo Boston.gov/b-together amd soo wac 311.

**Xagee Ayaan Tallaalka ka heli karaa?**

Guriga caafimaadka dadwenynaha ee Boston waxay taageerayaan xarumaha tallaalka guud ee dhamaan xaafadaha Boston todobaadyada soo socda. Tallaladu waa bilaash uma baahnid in aad balan samaysato ama muujiso cadaynta kaadka caymiska.

Liiska meelaha aad iska tallaali karto tallaalka Boston, fadlan nagu soo booqo tallaalka [Covid-19 ee boga macluumaadka Boston (Covid-19 Vaccine In Boston resources page)](#) Golobku wuxuu sidaa in uu sii wado barnaamijka tallaalka guriga. Waxaad ka akhriyi kartaa wax badan oo ku saabsan barnaamijka [halkan](#)

## MACLUUMAADKA SHAKHSIYADA

### Sidee Ayaan u Tusayaa In Aan Tallaalanahay?

Si aad u gasho mid ka mida ah xarumahan korka ku liistaysan, waxaad u baahan tahay in aad tusto cadayn ah in aad ka tallaalanyahay Covid-19. Cadayntaana waxaa lagu samayn karaa

- Kaadhka tallaalka ee CDc da
- Sawirka dhijitalka ee kaadhkaaga CDC da
- Sawir kasta ama daabacaad kasta oo diiwaanka tallaalka rasmiga ah
- App-ka magaalada loo qoondeeyay oo ka kooban sawirka dhijital ee diiwaan kasta oo tallaalka rasmiga ah.
- App kale oo xaqiijinta tallaalka covid, oo ay ku jiraan sida Clear Health Pass, Common Pass, Key to NYC, VaxYes, IATA Travel Pass iyo the Excelsior Pass.

### Goorma Ayay Tani Bilaabanaysaa?

Si loo siiyo dadka--- Gaar ahaan dhalinyarada wakhti ay ugu diyaar garoobaan shuruudahan cusub oo ay is tallaalaan, shuruuduhu waxaa la siinayaa wakhti.

| **Taariikhda:** | **Shuruud** |
| --- | --- |
| Sabti, 15ka Janaayo | Dadka da'doodu tahat 12 + waa in ay muujiyaan cadaynta ah hal xabo oo tallaal ah |
| Salaasa 15 Fabraayo | Dadka 12+ waa in ay muujiyaan Cadayn tallaal buuxa (hal ama laba xabo) |
| Salaasa, 1da Maarso | Dadka da'doodu tahay 12+ waa in ay muujiyaan cadaynta ah tallaal buuxa. Carruurta da'doodu u dhaxayso 5 - 11, waa in ay muujiyaan cadaynta ha xabo oo tallaala ah |
| Axad, 1da May | Dadka da'doodu tahay 5 +, waa in ay muujiyaan cadaynta ah tallaal buuxa (hal ama labo xabo) |

### Caawimo Ma u Jirtaa Dadak Degaanka?

Haa, waxaanu rabnaa in aanu fududayno sida ugu macquulsan dadka tallaalani in ay u muujiyaan inay tallaalanyihiin, iyo in aad ka caawiso dadka an weli is tallaawin in ay helaan macluumaadka iyo goobaha tallaalka ku habboon ee bilaashka ah ee bulshadaada. Waxaynu ahaan doonaa kuwo:

- U qaybiya waraaqaha macluumaadka Iskuulada, maktabadaha, guriyaynta, xarumaha bulshda iyo meelaha kale ee bulshada ee ku yaala Boston.
- La wadaaga macluumaadka iyadoo loo marayo ururada madaniga ah, shirarka bulshada iyo meelaha ururada caqiidooyinka iyo diimaha ku salaysan.
- Samayn wacyi gelin toos ah ee xarumaha iyo guryaha dadka waaweyn.

Wixii su'aalo ah ee ku saabsan sharcigan fadlan, la xidhiidh xafiiska adeega xaafada adigoo garaacaya 311.

**S: Ma jiraan wax is bedel ah oo lagu sameeyay waajibaadka waji-xidhka gudaha?**

J: May. Waajibaadka jawi-xidhashada gudaha ee Boston weli wuu shaqaynayaa. Hagida caafimaadka bulshada ee CDC iyo komishanka caafimaadka dadweynaha ee Boston ayaa ah in ka hotaga ugu fiican ee Covid-19 ay taha in la is tallaalo oo la xidho maaska ilaa iyo inta laga jiijonayo fiditaanka Covid-19 ee bulshada dhexdeeda.

**S: Marka aan tuso caddanyta tallaalka, miyaan sidoo kale u baahanay in aan tuso aqoonsigayga?**

J: May.Magaaladu waxay u baahan tahay oo keliya in dadku ay muujiyaan caddaynta in la tallaalay. Sharciga waxaa loo dejiyay si loo yareeyo caqabadaha muujinaya heerka tallaalka.Taas oo u sahlaysa dadka deegaanka ah ee aan haydsan aqoonsi dawladeed in ay muujiyaan caddaynta tallaalka. Ganacsiyadu waxay dooran karaan in ay ku soo rogaan shuruudahooda ka sarreeya sharciga ama shuruudaha magaalada, laakiin magaaladu ma fulin doonto wax shuruudo dheeraad ah.

**S. Ka waran haddi aan si khaldan u meeleeyay kaadhka tallaaka?**

J: Meheradaha ayaa looga baahan yahay in ay waydiiyaan kaadhka tallaalka. Haddi ay haysato taleefan kamarad leh waxaad ka qaadi karta sawir kaadha tallaalka ama ku soo rog appka xaqiijinta tallaalka Covid si loo hubiyo in la heli karo markasta. Ganacsiyadu waxay u ogolaan karaan macmiil in uu u soo galo ujeedo xaddidan, sida cunto la qaadanayo, taleefanka oo la buuxsanayo si loo suura geliyo in macmiishu tusaan caddaynta kaadhka tallaalka. Ganacsiyadu sidoo kale waxay samayn karaan

go'aan si ay ugu ogolaadaan gelitaanka ilmo yar oo la tallaalay oo ann tusi karin caddayn tallaal haddii ilma yar ama qofka wayn ee la socdaa bixin karo sharaxaad macquul ah

**S. Ka waran haddi aanan haysan taleefank casriga ah?**

J. Waad tusi kartaa in aad tallaalan tahay haddi aanad haysan taleefanka casriga ah adiga oo tusaya asalka ama nuqulka kaadhkaaga tallaalka ee CDC ama diiwaan kale oo tallaalka rasmiga ah.

**S: App-ka magaaladu ma la socon doonaa meelaha aan booqdo?**

J: May. Iyada oo magaaladu ay soo saarayso app-ka xaqqiijinta tallaalka Covid-19, waxaa loo qaabayn doonaa hal ujeedo oo kaliya: Si ay kuugu fududaato in aad ka tusto sawirka caddaynt tallaalka taleefankaaga. App-ku lama socon doono goobtaada mana la wadaagi doono wax xog ah hay'adaha kale.

**S: Wa waran haddii aan ku hadlo Luuqada aan Ingiriisi ahayn?**

J: Ogaysiinta dadweynaha ee lagu dhejiyo albaabka hore ee dhismaha gudaha waxaa loo qaybin doona luqadaha inta badan lagaga hadlo xaafad kast. Ganacsiyadu waa in ay aqbalaan caddayn tallaalka oo sax ah oo ka timid waddamo ka baxsan Maraykanka.

**S: Ma soo sheegi karaa ganacsi aan raacayn sharciga?**

J: Haddii aad aragto meherad aan raacayn aanad aaminsan tahay in ay raacaan, fadlan soo wac 311. Haddii aad tahay shaqaale ka walaacsan aargoosiga shaqa=bixiyaha, fadlan la soo xidhiidh Attorney General's Fair Labor Division.

**S: Sharcigan gudihiisa, miyaan u baahanahay tallaalka xoojiyaha?**

J:Sharcigan hadda kuma jirto in la hayso tallaalka xoojiyaha si loo galo dhismaha gudaha. Guddiga caafimaadka dadweynaha ayaa laga yaabaa in ay wax ka beddelaan qodobkan mustaqbalka, iyagoo la tashanaya xogta caafimaadka dadweynaha iyo hagidda CDC.

## MACLUUMAADKA CARRUUR

### S: Sharcigani saameeyaa carruurta?

J: Laga bilaabo Janaayo 15keeda 2022, sharcigani wuxuu saamayn doonaa dadka da'doodu tahay 12+. Laga bilaabo Maarso kowdeeda 2022, sidoo kale sharcigani wuxuu saamayn doona carruurta da'doodu tahay 5-11. Hadda sharcigani ma saameeyo carruurta da'doodu ka yar tahay 5 sano.

### S: Sidee ayay ganacsiyadu u xaqiijin karaan in shakhsigu ka yar yahay 5 sano lagana dhaagay sharcigan?

J: Meheradaha looga ma baahna in ay waydiistaan aqoonsi ay weheliso caddaynta tallaalku.Haddi macmiilku sheego in ilmahoodu ka yar yahay 5, ganacsiyadu waa in ay adeegsadaan go'aankooda ugu fiican si ay u meeleeyaan ilmahaas.

### S:Sharcigani ma saameeyaa iskuulada iyo iyo barnaamijka iskuulada?

J: May.Sharcigan waa laga reebay iskuuldada dadweynaha iyo kuwa aan ahayn iskuulada dadweynaha (xanaanada iyo fasalka 12d),safarka iskuulada, barnaamijka iskuulada, barnaamijyada daryeelka carruurta, iyo xarumaha bulshada. Ardayda ka qaybqaadanaya safarada iskuulada si ay u daboolaan aasaaska, sida madxafyada ama dhacdooyinka ciyaaraha fudud ee iskuuladu qabteen ama ka faalo qaadeen loogama baahna in ay tusaan caddaynta heerkooda tallaalka.

### S: Sharcigani ma saameeyaa Kuliyadaha iyo Jaamacadaha?

J: Sharcigani wuu ka reebay meelaha cuntada gudaha, meelaha jimicsiga iyo meelaha madadaalada ee ka dhex jirta machadyada tacliinta sare oo horey uga baahnaa tallaalka dhamaan xubnaha bulshada.

## MACLUUMAADKA GANACSIGA

### Doorkee ayay ku leeyihiin ganacsiyadu?

Ganacsiyada iyo haya'duhu waxay leeyiin oo ay ka ciyaaraan door muhiim ah, laakiin fidud barnaamijka B Together.

- Dhig ogaysiis dadweyne albaabka hore oo sheegaya in loo baahan yahay cadaynt tallaalka. Calaamad waxaa laga heli karaa [halkan.](#) Waxaa kale oo aad calaamad ka soo

qaadan kartaa meelaha ku yaala Boston, oo ay ku jiraan [20 Main Street locations,](#) [BCYF centers,](#) iyo [Boston Public Library](#).

- Hubi cadaynta tallaalka marka la soo gelo. Uma baahnid in aad hubiso heerka tallaalka gelitaanka, marka si degdega oo xaddidan loo soo gelayo, sida musqusha oo la gelayo, iyadoo wax la dalbanayo ama dalab la keenayo.

**Caawimo Ma U Jirtaa Ganacsiyada?**

Haa, Magaaladu waxay halkan u joogtaa in ay ka caawiso ganacsiyada in ay si guul leh uga qayb qaataan.

- Xafiiska adeegaha xaafada iyo xafiiska ganacsatada yar yar ayaa samany doona wacyigellin toosa meheradaha ku yaala Main Street iyo qaybaha kale ee qanacsiga ah si ay wax u baraan mulkiilayaasha qanacsiga, iyo shaqaalaha iyo kordhinta ka warqabka bulshada shuruudaha tallaalka Covid-19.
- Magaaladu waxay marti gelin doontaa taxane webinar ah si ay u baraan mulkiilayaasha ganacsiga shuruudaha tallaalka Covid-19, su'aalihiinana way qaadan doonaan.
    - ☐ Salaasa, 21 ka Diisember, 3:00 galabnimo - [Halkan iska diiwaan geli](#)!
    - ☐ Arbaca 29 ka Diisember, 10:00 Subaxnimo- [Halkan iska diiwaan geli](#)!
    - ☐ Salaasa, 4 ta Janaayo, 3:00 Galabnimo - [Halkan iska diiwaan geli](#)!
    - ☐ Khamiis,13 ka Janaayo, 10:00 Subaxnimo- [Halkan iska diiwaan geli](#)!
- Siinta calaamadaha ganacsatada, si toos ah iyo soo dejinta dhijitalkuba waa diyaar.

Waanu sii wadi doonaa in aanu ku darno dhacdooyin badan oo ka qayb gal iyo webinarba ah. Wixii su'aa ganacsi ah ee aad qabto, fadlan kala soo xidhiidh kooxda hurumarinta ganacsatada yar yar ee laga helo [smallbiz@boston.gov](mailto:smallbiz@boston.gov).

**Liiska Buuxa ee Meelaha La Cayimay iyo Ganacsiyada**

Ku cintaanka Gudaha:Oo ay ku jiraan qaybaha gudaha ee xarumaha adeega cuntada ee bixiya cunto iyo cabitaan,oo ay ku jiraan makhaayadaha, baararka, iyo dhammaan meelaha wax lagu cuno gudahooda ee xaruma adeega cuntada. Shuruudaha Amarkan laguma dabaqi doono xarun kasta oo adeega cuntada ah oo bixisa cunto iyo/ama cabitaan gaar ah oo loogu talagay in lagu cuno dibeda ama bannaanka, ama xarun addeg cunto oo bixisa adeega samafalka ah sida kijada maraqa (soup kitchens)

Is dhexgalka, madadaalada gudaha, goobaha dhacdooyinka: Marka lagu daro Shineemooyinka, muusikada, goobaha riwaayadaha, dhacdooyinka ganacsiga,

goobaha xafladaha, madxafyada, garoomada ciyaaro xirfadeedka, garoonka gudihiisa, xarmaha dhaqanka, qolka bandhiga, fanka riwaayadaha, meesha kubada tuur tuuro (Bowling Alleys) iyo meelaha kale ee madadaalada ah.

Gudaha meesha jimicsiga iyo habaynt jidha:  Marka lagu daro ganacsiga jimicsiga, jidh dhiska, meelaha yoogada/pilates/barre/qoob ka ciyaar, feedtanka/feed-laadka,xerooyinka jimicsiga,dabaasha gudaha, iyo xaruma kale ee loo isticmaalo in lagu sameeyo fasalo jimicsiya oo kooxo ah.

**S: Ka waran haddii qofku uu u diido in uu tuso caddaynta tallaalka meelaha soo sheegay?**

J: Qofka diida in uu tuso caddaynta tallaalka ma geli karo aan ahayn xaalad yar oo degdega sida (musqul isticmaalkeeda, cunto qaadasho, iyo bixinta biilka). Marka goobta la gelo xaalad xaddidan, gofku waa in uu xidhaa maaska.Haddi shakhsi uu awoodi waayo in uu tuso caddaynta tallaalka ganacsatadu waxay la wadaagi karaan wada hadal si ay ugu helaan xal macquul ah, sida in qofku cuntada qaato halkii uu gudaha ku cuni lahaa, ama ku biirida qaabka-muuqaalka halkii ahayd in uu yimaado jimicsiga. Si aad u hesho hagitaan dheeraad ah oo ku saabsan hirgelinta sinaanta ee sharcigan, riix halkan

**S: Haddii uu qof soo galo meherad wakhti yar, ujeedo xaddidan, ganacsigu miyuu u baahan yahay in uu waydiiyo caddayn tallaal?**

J: No. Kuwa soo gala meelaha la soo xusay wakhti yar oo xaddidan oo keliya, sida isticmaalka musqusha, cunto qaadasho ama biil bixin, loogama baahna in ay caddayn tallaal tusaan.

**S: Ganacsiyadu miyay u baahan yihiin in ay eegaan caddaynta tallaaka ee alaab-qaybiyayaasha iyo wadhatada?**

J: Kuwa soo gelaya xarunta wakhti yar oo keliya oo xaddidan, sida alaab loo keeno hudheel, uma baahna in ay tusaan caddaynta heerka  tallaalka. Shakhsiyashaasi waa in ay xidhaan mask. Qandaraaslayaalka iyo wadhatada waday soo gelayaan ganacsiga wax aan ahay wakhti yar oo dhakhso ah xaddidana, ganacsigu waa in uu eegaa heerkooda tallalka marka ay soo gelayaan.

**S: Ma jiri doonaa dhaqan gelin ka dhan ah ganacsadayaasha aan raacin sharcigan?**

J: Hadafka magaaladu waa in laga caawiyo ganacsatada in ay raacaan sharciga si aan u dhiiri gelino tallaalka una xaddidno khatarta macaamiisha iyo shaqaalaha. Mar alla marka shuruudaha Covid-19 ay dhaqan galaan Janaayo 15keeda, kormeerayaashu waxay samayn doonaan hubinta u hoggaansanaanta. Meheradaha lagu helo in ayna u hoggaansanayn waxay heli doonaan digniin. Haddii ganacsadayaashu ay sii wadaan in aanay u hoggaansanaan sharciga, waxaa laga yaabaa in la ganaaxo ama ay la kulmaan tallaabo kale oo dhaqan gelin ah. Ujeeddada magaaladu waxay noqon doontaa hubinta in hay'adaha la xusay ay fahmaan sharciga oo ay helaan fursad kasta oo ay ugu haggaansamaan.

**S: Ganacsatadu ma hayn karaan qoraalo si ay u xaqiijiyaan heerka tallaalka ee macaamiishooda joogtada ah ama martida, halkaa ay ka waydiin lahaayeen markasta oo ay soo galaan?**

J: Meheradaha xubinnimada kelya leh, sida meelaha jimicsiyada, ayaa laga yaabaa in ay ururiyaan liiska caddaynta macmiishhoda. Ganacsiyadu waa in ay siiyaa xubnaha ikhtiyaar ay ku tusaan caddaynt tallaalka markasat oo ay soo galaan meherada iyada oo aan heerka tallaalka la gelin kaydka xogta. Ganacsatadu waa in ay awood u yeeshaan in ay u muujiyaan kormeerayaasha sida ay u xaqiijin lahaayeen heerka tallaalka xubnaha

**S: Ka waran haddii macmiil sheegaan in ay aanay qaadan Karin tallaalka caafimaad, naafada, ama sababo kale oo xuquuqda aadamiga ah?**

J: Meheradaha la xusay waxay u baahanyihiin caddayn tallaal. Haddii macmiil codsado in laga dhaafo naafo, caafimaad awgeed ama sababo xuquuqda aadamiga ah, Meheradaha waa in aanay waydiinsan dhukumentiyo lagu taageerayo codsigan. Taa beddelkeeda, ganacsiyadu waa in ay la galaan wadahadal iskaashi ah si ay u helaan hab kale oo adeeg ah, sida siinta qaadashada halkii aad ku cuni lahayd meherada gudaheeda. Meheradaha Masha in ay fall caynkaas ah bixiyaan haddii sidaas la sameeyay ay khatar ku abuurayso macmiisha iyo shaqaalaha kale ee meherada, marka lagu daro halista caabuqa Covid-19, ama ganacsiga u keenaysa dhibaato aan loo baahnayn. Si loo helo hagitaan sinnaan ah oo dheeraad ah oo ku saabsan hirgelinta sharcigan, riix halkan.

**S: Sidee sharcigani u saamaynayaa xarumaha ujeedooyinka badan, sida maktabadaha iyo xarumaha bulsada?**

J: xarumaha ujeedooyinka badan leh gudahooda qaybo Ka mid ka mid ah aasaaska ayaa laga yaabaa inay dabooli karto sharcigani ( ku cunitaanka gudaha, jimicsiga, ama hawlaha is dhexgalka) xarumuhu waxay ku muujin karan calaamaraha albaabka laga soo galo meelaha la xusay ee xarunta ujeedooyinka badan leh, tusaale ahaan, albaabka qolka jimicsiga ee hoteelka, halkii laga dhigi lahaa albaabka hoteelka laftiisa. Caddaynta tallaalka waxaa lagu eegi kara albaabka xarunta, ama ablaabka xarumaha la xusay, iyadoo la raacayo go'aanka xarunta.

**S: Sharcigani miyii sameeyaa hoteelada?**

J: Martina hoteelka ee istickaalaya tashiiliyaadka uu daboolayo sharcigani (ku cuntaynta gudaha, marka lagu daro makhaayadaha, baarka iyo meelaha lagu caweeyo, jidh dhiska gudaha ku yaal, marka lagu daro jimicsiga iyo berkeda dabaasha, iyo madadaalada gudaha, marka lagu daro qolalka shaqada) waxaa looga baahanyahay in ay tusaan caddaynta tallaalka iyo shaqaalaha ka shaqaynaya xarumahaan waa in ay qaataan tallaalka. Shaqaalaha hoteelka ee aan sida caadiga ah uga shaqayn tas-hiilaadka u daboolay sharcigani sida, shaqaalaha miiska hore, shaqaalaha wax nadiifiya, ama shaqaalaha gaaashka uma baahna inay tusaan heeka tallaalkooda. Meelaha looga tala Galaxy shaqaalaha oo keliya ee aan u furnayn dadweynaha, sida makhaayadaha shaqaalaha, amarkani ma doboolayo. Amarkani ma daloobayo adeega qolka cuntada ee aan u furnayn dadweynaha.

**S: Dhacdooyinka gaarka ah ee hoteelada ama goobaha xafladaha miyii sharcigani khuseeyaa oo daboolayo?**

J: Haa, Dhacdooyinka meelaha la xusay oo dhan sharcigani wuu khuseeyaa wuuna dalooyaa. Dhacdooyinka lagu qabto hoteelka ama meelaha xafladaha ugu danybaynta waxaa ka masuula qolka liisanka haysta. Maria intaa la yidhi, hoteelada ama goobaha xafladaha ee kale ayaa dooran kara in ay u xil saaraan xaqiijinta heerka tallaalka qorsheeyaha ama martigeliyaha dhacdada. Waa mas'uuliyadda qofka liisanka haysta, hoteelka ama goobaha xaflada, in uu muujiyo u hoggaansanaanta amarka haddii ay dhacdo kormeer ama warbixin xadgudub.

**S: Miyaa macaamiisha ku cuntaynta banaanka makhaayadaha looga baahanyahay caddaynta tallaalka?**

J: May. Sharcigani wuxuu khuseeyaa oo keliya qaybta gudaha ee ka mida aasaaska adeega cuntada.

**S: Ma makhaayadaha bixiya cunto geynta amd laga qaadashada oo kelya ayaa laga dhaafay waajibaadka tallaalka?**

J: Haa. Sharcigani ma khuseeyo xarun kasta oo adeeg cunto kasto oo bixisa cunto ama cabitaan si gaar ah loogu isticmaalo meel ka baxsa ama isticmaalka debeda.

**S: Miyaa looga baahan yahay makhaayadaha adeega degdega ah bixiya ee leh labadaba cunto qaadasho iyo gudaha in lagu cuno in ay albaabka ku hubiyaan caddaynta tallaalka macaamiishooda oo dhan?**

J:May. Macaamiisha u soo gelaysa dhismaha korka ku xusan ujeedo degdega oo xaddidan sida, qaadashada cunto ay dalbadeen loogama baahna in ay tusaan heerka tallaalkooda. Makhaayadaha adeega degdega ahi waa laga yaabaa in ay ku waydiiyaan goobta adeega caddaynta tallaalka ka dib marka macaamiishu u sheegeen in ay qorshaynayaa in ay gudaha ku cuntaynayaa halkii ay ku cuntayn lahaayeen albaabka hore.

## MACLUUMAADKA SHAQAALAHA

**S: Shaqaalaha xarumaha la soo xusay miyaa looga baahan yahay in ay is tallaan?**

J: Haa. Sharcigani wuxuu khuseeyaa labadaba macaamiisha iyo dadka ka shaqaynaya isla meel gudaha ah.

**S: Shaqaaluhu ma soo gudbin karaan testi toddobaadle ah si ay bedelka tallaka u noqdaan?**

J: May. Sharcigani ma ogol testi toddobaadle ah si loogu bedelo heerka tallaalka.

**S:Haddi aanu shaqaalaha ganacsiga la soo xusay tallaalnayn, magaaladu miyay u baahantay in shaqaalahaa shaqada laga joojiyo ama fasax la geliyo ilaa iyo inta ay isa soo tallaalayaan?**

J: Ujeedada sharcigani ayaa ah in laga hortago faafitaanka Covid-19 iyo in dadka lagu dhiiri geliyo in ay qaataan tallaalka. Waa masuuliyada ganacsiyada la xusay in ay hubiyaanin shaqaalaha ka shaqayndoona meelaha sharcigani soo xusay ay qaadaan tallaalka. Magaalada iyo Boston Public Health Commission waxay sii wadayaan in ay taageeraan xarumaha tallaalka ee socod-siinta (walk-in) ee xaafadaha oo dhan. Liiska dhamaan rugaha tallaalka ee Boston si joogto ah ayaa halkan loogu cusboonaysiiyaa. Tilmaamaha ka jawaabida codsiyada meelaynta macquulka ah ee caafimaadka, naafada ama sababaha kale ee la xidhiidha xuquuqda madaniga ayaa halkan ku jirta. Go'aamada ku saabsan xa u yeelashada faa'iidooyinka shaqo la'aanta waxaa guud ahaan sameeya waaxda kaalmada shao la'aanta. Waydiimaha u-qamitaanka waa in lagu hagaajiyaa wakaaladda maamulka.

**S:  Ganacsiyada miyay waajib ku tahay in ay la wadaagaan magaalada heerka tallaaka ee shaqaalahooda?**

J: May. Magaaladu ma waydiinayso  shaqo-geliyaha in u la wadaago heerka tallaalka ee shaqaalihiisa.  Si uu u caddeeyo shaqaalaha heerkooda tallaalka, loo shaqeeyaha waxaa laga yaabaa in uu hayo liiska shaqaalaha iyo caddaynta in shaqaale kastaa uu muujiyo heerka tallaalka. Shaqaalaha loogama baahna in ay muujiyaan heerkooda tallaalka mar kasta oo ay soo galaan megeradaha. Wixii macluumaad tallaal ah ee loo-shaqeeyuhu qabtay waa in la ilaaliyaa laguna kaydiyaan meel ammaan ah si loo hubiyo xogta iyo amniga macluumaadkaas. Macluumaadka noocaas ah waa in ay heli karaan oo keliya shaqaalaha ama shakhsiyaadka kale ee baahi sharci ah u qaba helitaanka macluumaadkaas. Macluumaadka tallaalka waa in aan loo isticmaalin ujeedo kale.

**S: Maxaa dhacayaa haddi shaqaaluhu sheego in aan la tallaali karin sababo caafimaad, deemeed ama kuwo kale?**

J: Ganacsadayaasha la xusay waxaa ku waajiba in ay waydiiyaan shaqaalahooda caddaynta tallaalka. Haddi shaqaalahu waydiisto in laga dhaafo shuruudaha tallaalka ama la siiyo wakhti dheeraad ah oo ay ku keenaan caddaynta tallaalka,  ganacsiyadu waa in ay la yeeshaan wada hadal iskaashi ah, ama dood wanaagsan, si loo eego in ay meelayn macquuli suragal tahay. Meelaynta macquulka ahi waxaa laga yaabaa in ay

yeelato qaabab badan, sida in loo ogolaado shaqaalaha in uu ku shaqeeyo guriga, ku gutaan waajibkooda shaqo banaanka ama laga takooro shaqaalaha kale ama macmiisha, ama fasax qaataan. Haddi shaqaaluhu u raadinayo meelaynta macquulka ah sababo naafonimo ama qaar la xidhiidha xaga caafimaadka, waxaad ka codsan kartaa dhakhtarkooda warqad waafaqaysa karti la'aantooda ay ku keeni waayeen caddaynta tallaalka. Haddi shaqaaluhu uu u raadinayo meelaynta macquulka ah sababo waxay ka aaminsanyiin diintooda, ama sababaha kale ee xuquuqda madaniga ah, waxaad codsan kartaa dukumenti taageero ah keliya haddi aad shaqi ka qabto daacadnimada awood la'aanta uu shaqaaluhu u keeni kari waayay caddaynta tallaalka. Si aad u hesho heltaan dheeraad ah oo ku saabsan hirgelinta sinaanta ee sharcigan, riix halkan

## SU'AALO DHEERAADKA OO INTA BADAN LA IS WAYDIIYO

### Ma jiraan wax is beddel ah oo ku jimid waajibaadka af-xidhka/maaska gudaha?

No. Waajibka maas ku xiidhashada gudaha ee Boston weli way socotaa. Hagida caafimaadka Bulshada ww CDC iyo komishinka caafimaadka bulshada ee Boston ayaa ah in ka hortaga ugu fiican ee Covid-19 uu yahay in la is tallaalo iyo in maaajka la xidho ilaa iyo inta hoos loo dhigaya faafitaanka caabuqa Civid-19.

### Marka aan tuso cadaynta kaadka tallaalkayga, miyaan sidoo kalee u baahanay in aan tuso kaadhka aqoonsigayga?

No. Magaaladu waxay keliya ee u baahany in dadku tusaan cadaynta ah in ay ka tallaalan yhinn Covid-!9.

### App-ka magaaladu ma la socon doonaa meelaha aan booqdo?

No. Marka magaaladu ay soo saarto App-ka, waxaa loo qaabayn doonaa hal u jeedo oo keliya: si ay kuugu fududayso In aad ka tusto taleefankaaga sawirka cadaynta tallaalkaaga.

### Shaqaalaha meheradahaani myay u baahan yihiin in la tallaalo?

Yes. Sharcigani wuxuu khuseeyaa labadaba, macaamiisah iyo shaqaalaha ka shaqeeya gudaha.

## Ka waran hadii aan waayo ama aan qaran waayo meel aan kaadhkaygii tallaalka dhigay?

Meherada waxaa looga baahanyahay in ay waydiiso tallaalka caafimaadka. Ganacsigu wuxuu u ogolaan karaa macmiisha in uu soo galo wakhti xaddidan, sida cunto uu qaado, taleefanka oo ay buuxsadaan/recharge si ay u awoodaan in ay tusaan sawirka dhijitalka  ee kaadhka tallaalka. Ganacsigu wuxuu kale oo samayn karaa go'aan ah in uu ugolaado ilmo yar oo tusi kari waayay kaadhkiisa tallaalka, haddi ilmaha yar ama qofka wayne ee la socdaa uu bixiyo sabbab macquulka ee aan loo hayn kaadhka.

## Ka waran haddi uu qofku sheegay in aan la tallaali karin sababo caafimaad dartedd?

Meheradaha korka ku xusan waa in ay u baahdaan cadaynta kaadhka. Haddi macmiilku codsado ka dhaafitaan shuruudada tallaalka naafo darteed, la samee wada hadal iskaashi oo macquulka ah si loo eego haddi hoy macquul ah ay suura gal tahay. Ganacsigu maaha inuu bixiyo hoy macquul ah haddi taasi ay dhalinayso khaatar toos ah (marka lagu daro u dhawaanta dadka aan tallaalayn) macmiisha kale iyo shaqaalaha ganacsiga, ama u keenaysa ganacsiga dhibaato aan loo baahnayn.

## Ma waxaa jiri doonta dhaqangelin ka dhan ah ganacstada aan raacing sharcigan?

Hadafka magaaladu waa in laga caawiyo ganacsatada in ay raacaan sharcigan si aan u dhiiri gelino tallaalka oo loo xaddido khatarta macaamiisha iyo shaqaalaha. Mar haddii shurrudaha tallaalka Covid ay dhaqan galaan Janaayo 2022, kormeerayaasah magaalada ayaa hubin doona in loo hogaansamo.ganacsatada laga helo cabasho ee aan sharciga raacaynini waxay heli doonaan digniin. Haddi ay ganacsatadu sii wadaan in ay u hogaansami waayaan sharcigan waxaa laga yaabaa in lagu ganaaxo ama ay wajahaan tallabo kale oo dhaqan gelin ah.

## Ka waran haddi qofku u diido in uu tuso cadaynta tallaalka goobaha kolka lagu xusay?

Qofka diida in uu tuso cadaynta tallaaka ma soo geli karo, aan ahayn si    degdega oo uu ku (gelayo musqusha, ka qaadanayo cunto ama bixinayo biil)  Marka la soo gelayo goobta ujeedadan xaddadan waa in uu qofku maaska xidho.

**Ma soo sheegi karaa ganacsiga aan raacayn sharcigan?**

Haddi aad aragto ganacsi aan raacayning sharcigan aanad aaminsantahay, fadlan wac 311. Haddi aan shaqaale tahay oo aad ka baqanayso aargoosi la soo xidhiidh Attorney General's Fair Division,

**Sharcigani ma khuseeyaa cunitaanka gudaha, madadaalada iyo jimicsiga Iskuulada?**

May. Sharcigaan ayaa laga reebayaa xannaanada hore ilaa iyo fasalka 12naad ee dugsiyada dadweynaha, kuwa aan dawliga ahayn, xanaanooyinga carruurta, xarumaha dadka waawayn iyo xarumaha bulshada. Sidoo kale sharcigani ma khuseeyo koolejyada, jaamacadaha gudahooda ee horeba uga baahnaa tallaaalka dhamaan xubnaha bulshada.

**Ka waran haddi aanan haysan taleefan casri ah/smartphone?**

Waa tusi kartaa cadayntaada adiga oon haysan taleefanka casriga ah, waxaad tusi kartaa kaadhak CDC ama tallaal kast oo kale oo rasmi ah.

**Ka waran haddi aan ku hadlo luuqad aan Ingiriisiga ahayn?**

Ogaysiisyada sharciyada ee lagu dhejinayo albaabka hore ee dhismaha gudaha waxaa lagu turjumi doonaa luuqadaha inta badan lagaga hadlo xaafad kasta.

**Miyaan u baahanahay irbada tallaal xoojinta marka loo eego sharcigan?**

Hadda ma jirto wax shuruud ah oo ku jira sharcigan in la qaato irbada xoojinta. Guddiga caafimaadka dadweynaha ayaa laga yaabaa in uu wax ka beddelo qodobkan mustaqbalka, iyada oo lala tashanayo xogta caafimaadka dadweynaha iyi hagidda CDC.

## Macluumaadka Tallaalka Covid-19 Ee Boston

Liisto buuxda meelaha aad iska tallaali kartid ee Boston, fadlan soo booqo bagekayaga Covid-19 Vaccine In Boston resource page